




Garaad Wiilwaal

Leveled



Af Somali



Buuggan akhriska dheeriga waxaa maalgalisay hay'ada USAID. Waxaana si wada jir ah isaga kaashaday daabcayna hay'ada Save the Children, wasaarada waxbarashada heer federal iyo xafiiska waxbarashada DDSI.

2009 T.I.



The CC By license lets others distribute, adjust, and build upon this work, for free or commercially, as long as credit is given to the original creation. However, any changes from the original must be indicated.


For more info please refer: <https://creativecommons.org/licenses/>



Garaad Wiilwaal

Fasalka 4

Toddobaadka 26



Baraha qaaliga ahow

Waxaa buugan luugu talagalay in uu kobciyo awooda akhriska ee radayda fasalka 4^{aad}.

Waxaaana lagu saleeyay manhajka cusub ee af-soomaaliga. Doorarka baruhu aad ayuu mihiim ugu yahay in ardaydu ka faa'iidaystaan buugan.

Sababtoo ah waxaa laga raba baraha in uu ku booriyo ama ku dhiirigaliyo carruurta in ay akhristaan buugtan. Hadaba baruhu waa in uu raaca talaabooyinkan soosocda, marka ay tahay ardaydu in ay ku akhristaan fasalka gudahiisa.

1. Ka hor intayna ardaydu akhrinta sheekada bilaabin, waa in uu baruhu weydiiyaa su'aalaha ka horeeya sheekada.
2. Waa in uu baruhu ardayda siiyaa waqti fiican ooy ku akhrin karaan sheekada.
3. Baruhu waa in uu usheegu ardayda in ay ku celceliyaan akhriska sheekada.
4. Ardaydu markay dhammeeyaan akhiska sheekada, baruhu waa in uu waydiiyaa su'aalaha ku qoran dhammaadka sheekada.

Laylis

Su'aalaha akhriska ka hor

1. Qof caynkee ah ayuu ahaa garaad wiilwaal?



Cutubka 1^{aad} : Hordhac

deegaanka soomaalida Itoobiya Waxaa soomaray dad badan oo caan ahaa kuwaas oo laga yaqaannay caalamka. Badanaa dadku waxay caanku noqdaan sida hal abuurka maansada, halganka, xikmada hadalka, hogaaminta fiican. Hadaba dadka deegaanka caanka ka ah waxaa ka mid ahaa sida:- Sayid Maxamed Cabdile xasan, Raage ugaas, Qaamaan bulxan, Barni sheekh Cabdile iyo Garaad xirsi Garaad faarax (Garaad wiilwaan) iyo kuwo kale

Sidaa darteed waxaan halkan kaga hadlaynaa
taariikhdii garaad wiilwaal

Xilli lagu qiyaasay qarnigii 16^{aad} ayaa waxaa jiray
boqor Soomaaliyeed oo la odhan jiray Wiil Waal.
Waxaa lagu sheegay inuu ahaa nin xukun adag
xikmadse badan wuxuu ahaa hoggaamiye cimrigiisa
badankiisii ku idlaystay duulaan iyo difaac joogta ah.
Wuxuu ahaa nin aad u firfircoon yaraantiisii oo ka
dhexmuuqday dhalinyarta da'diisa ah. soomaalidu
waxay ku maahmaahdaa sumal baraar kuma jiro.


Garaadku wuxuu ahaa nin dadka aad u imtixaama oo
isku daya inuu qof walba garashadiisa, dadnimadiisa
iyo aqoontiisa dhudhumiyo ama ogaado.

Maalin maalmaha ka mid ah ayuu shir qabtay wacay
oo uu isagu yeedhay odayaashii beesha joogay. Wuxuu
codsaday in nin walba oo soo gaadhi kara shirka

yimaado xataa kuwa baahida gaarka ah qaba (naafada ah).

Guud ahaan wixii meelaha ka dhawaa ayaa isu yimid Af-niijiye (qofka dadka warka gaadhsiiya siddii makarafoonkii) ayuu idmay. Garaadku intuu shirkii ka dhex kacay ayuu faray in nin walba gurigiisii ku noqdo, shirka barrito la isugu imanayana uu keeno “cadka rag walaaleeya.” Raggii shirka yimid oo yaaban oo war tolow maantana muxuu arintan cusub uga jeedaa is leh ayaa dib ugu noqday guryahoodii.

Raggii Way shireen oo war rag talo kama dhamaatee
muxuu Wiilwaal raadinayaa ayay is weydiyeen!
Cadka rag walaaleeya ayaa in badan laga dooday.
Muxuu yahay mase jiraa? Si guud iyo gooni gooniba
raggii way u shawreen hase ahaatee dhakafaar
ayey ka qaadeen arinta. Ninba ninkuu garasho ku
tuhmayey ayuu dhinac ula baxay oo war maxay kula
tahay waydiiyay “Maantana maxay noqon siddii,
Muxamed loo yaabye”.



Cutubka 2^{aad}: Shirkaa Odoyaashe

Odhaahdan ayuu xaalkoodu ku sifoobay markii ay isku daaleen wax ur ahina u bixi weyday ayey ku kala faadhumaaysteen. Waxayna yidhaahdeen war bal faq iyo gorfeyn waxba ku soo saari weynayee, nin walba iskii ha uga soo fakaro arinta, cadkii uu ka badin waayana barito ha keeno.

Aqaladdoodii haddii ay tageen wuxuu nin walba reerkiisii warsaday in neefka adhiga ugu shilis la gawraco hilibkana si cajiib ah loogu sameeyo.

Nin walba wuxuu si gooni ah u codsaday cadkii uu islahaa ragga ayuu walaaleeyaa. Midbaa codsaday in garabka loo diyaariyo, midbaa codsaday in sararta loo diyaariyo, mid kalaa codsaday kuruska, midba cad gaar ah ayuu codsaday.

Waxaa raggaas la xujeeyey ka mid ahaa nin caydh ah oo aan bar adduun ka nixin tobaneeyo neef oo adhi ah mooyee. Ninku wuxuu lahaa carruur rajooyin ah oo isugu jira gabadh iyo labo wiil oo uu soo korsaday aabe mutaxan ama qudha ayuu dadka qaarkii u yaqaanaan ninka sidan ah. Carruurtaa waxaa ugu weynayd gabadh 16 jir ah oo la wariyey inay qurux iyo qiimo dheeraad ah lahayd. Gurigiisii ayuu tagay odaygii wuxuuna gabadhiisii faray inay birta ka asasho ama gawracdo sabeenta neefafkooda ka dhaqaaqaysa uguna qiimaha badan.

Gabadhii baa tidhi ee aabo, caydh ayeynu nahay ee miyuu inaga baxaa neef aan gawracno maanta, maxaadse sabeenta adhigaba laga qaato ku maagtay?. Aabo miyaan ikhyaar leeyahay saw Wiil-

Waal raggii ma amrin inay sidaa yeelaan, waynu ku qasbanahay ee aabo sarakac oo durduri, ayuu ugu jawaabay. Odaygan oo ahaa nin isagu caqli badan Way u muuqatay danyaraanta gabadhu ka calaacashay. Hasa ahaatee odaygu wuxuu laabta ku hayey cidhib xumada ka dhalan karta amarka Garaadka oo uu ka madax-adaygo ama diido.


Sabeentii ayaa la xalaaleeyey oo la gawracay Markii la diyaariyey ayuu odaygii kala doordoorasho galay isagoo kolba cad qaadaya-dhigaya oo leh tolow ma kanaa mise waa kaa. Ugu dambayntii ayuu doortay bawdo oo uu yidhi tanaan la tagayaa? Gabadhii ayaa mar kale la yaabtay aabaheed oo su'aashay xaggeed geynaysaa aabo?

Garaadka ayaa na faray in nin walba shirka la yimaado “cadka rag walaaleeya” sidaa awgeed waa inaan bowdadan qaadaa. Wuxuuna yidhi aad bay iila buuran tahay una malayn mahayo in cid mid ka wanaagsan keeni karta ay jirto, ayuu ku juwaabay. Wax Alla wuxuu uga jeedo garan mahayo, laakiin jid

kale iima furna inaan warka Garaadka yeelo ma ahee, ayuu isku dayey inuu gabadha ku qanciyo.

Gabadhii ayaa qadar gaaban aamustay oo ka fikirtay xujada aabaheed iyo raggii kaleba haysata. Aamuskaa gaaban ka dib ayey tidhi maya aabo ha qaadin cadkaa maxaa yeelay ma aha midka Wiil Waal doonayo!.

Odaygii ayaa ku adkaystay inuusan cad aan kaa ahayn shirka gaynaynin. Gabadhii oo ku dadaalaysa in aabaheed xujada furo, ayaa mar kale tidhi maya aabo ha qaadin kaa. Aniga i maqal oo waxaad qaadaa hunguriga! Odaygii ayaa amakaag qabsaday! Ma anigaa shirka hunguri la taga, oo Garaadka waxaas oo xurmo darro ah u gaysta. Alla maxaad gabadhyahay waalan tahay anna inaad i waasho damacsan tahay.



Cutubka 3^{aad}: Tashigii gabadha iyo aabaheed

Aabo aniga i aamin marabo inaan kuu sheego sababta maxaayeelay Garaadka naftiisa ayaa kuu sharxi doona ee adigu hunguriga shirka la tag. Wixii denbi ah ee halkaa ka dhashana anigaa dusha u ridan doona, ayey tidhi. Odaygii ayaa dhiiranaanta iyo isku kalsoonida gabadha yar ka muuqata la yaabay kolkaa ayuu cabbaar qadariyey fikraddeeda. Odayga waxaa u muuqan waayey sababta yartu hunguriga

u xulatay iyo innuu hungurigu dheer yahay cadadka kale. Wuxuu mar is yidhi waa dhallaannimo iyo waayo aragnimo la'aan, laakiin isla markiiba wuxuu xusuustay in gabadhu caaqilad weyn tahay. Gabadhan inkastooy da'yartahay hadana talo ay soo jeedisay hadda ka hor aan lagu hungoobin. Mar wuxuu is yidhi, adiga ayaa lagu xujeeyey ee Allaa ku lehe arinta go'aankeeda ku calool adayg sida kula qumanna yeel. Laba qalbiyeyn, balacbalac iyo walaac ayaa laabta is tubay waxaa dhagihiiisa ka guuxay "wixii denbi ah anigaa oogada u ridan doona."

Mar dambe ayuu ku jawaabay waayahay waxaan qaadayaa hunguriga maxaa yeelay gabadh caqli badan inaad tahay ayaan ogahay. Calool adayg waa Alla wehel kii, ee hadday dan mooddo baddunna buurta ha talowdo ayuu isku tirtirsiiyey. Gabadhii ayaa aad u faraxday Waxay dareensanayd inay ku guulaysatay furidii xujadii Garaadka, aabaheedna inay magac iyo sumcad usoo jiiday. Farxad, isu hambalyeyn iyo is mahadin ayna muujinin ayaa

saaqay. Shirkii ayuu odaygii u dhalandhoolay. Wuxuu ugu tagay raggii amarka la siiyey oo mid walba cad soo qaaday mid walbana ka kale ka qarinaldo cadka uu doorbiday. Nimankii way is wada fiirfiiriyeen, isfiirfiirin tuhun iyo Allow ceeb astur ku dheehan tahay Wax yar ka dibna Garaadkii ayaa soo muuqday.

Asalaamu calaykum Wacalykuma salaam iyo waxay isku dareen war Garaadka u sarajoogsada. Garaadkii baa yidhi fadhiista idinkoo mahadsan nin walbana shaaca ha ka qaado cadka uu soo saaray, ayuu si gaaban u ogeysiiyey. Dhinacii odaygii miskiinka ahaa fadhiyey ma ahee dhinaca kale ayaa dhawaaqii u horreeyey ka yeedhay, Nin walbana daboolka ka rogay cad aad loo soo habeeyey ma bowdaa, ma garabbaa, ma sararbaa, cadba cadkuu ka gashin wanaagsanaa. Odaygii ayaa talo ku ciirtay oo hamiyey in dhulku la go'oo Allow i xil furo mooyee weedh kale ayuu afkiisu haleeli waayey. Wuxuu is yidhi adiguba bowdadaa ama sakaarka hebel keenay oo kale unbaad la iman lahayd ee tii yarayd ayaa Alle kuusoo diray oo ku waashay.

War ileen talo isuma kaa sheegto iyo Alla caqligu xaasidsanaa ayuu hoostaa ka guray gabadhiisii ayuu hiifay ileen iyadaa u soo xambaarisay cadkan baasee.

Hadal af-ka ka weyn iyo talo haween raace tagoogtuu ka jabaa iyo maahmaahyo la mida ah ayuu xusay. Garaadkii ayaa weydiiyey: oday adna maxaad soo qaaday? Meel uu ka noqdo ma joogee wuxuu daboolka ka rogay hungurigii. Intaas ka dib markay dhawr jeer gacantiisu dib uga noqotay ayuu hungurigii kor u qaaday talo dhabaqday! Wixii rag shirka fadhiyey ayaa mar kaliya af-labadii dhawaaqay. “War ninku miyuu waashay mise wuu soo wataa” ayaa gees walba ka yeedhay.

“Ma foolxumo intaa le’eg iyo ixtiraamdarro heerkaa gaadha ayaa Garaad Wiil-Waal maanta loo geystay.”
“Lun adduunoow! Hunguri sideebuu madasha u keeni karaa!”.



Cutubka 4^{aad}: Shirkaa Garaad Wiil Waal

Qaarkood haddii aysan Wiil Waal wajigiisa ku ixtiraamaynin gacantooda ayaaba gaadhi lahayd ninkan ay u arkeen inuu lama maqal, lamana arag dhigay. Odaygii oo awalba walbahaarsanaa ayaa sawaxanka ragga ka yeedhay rucbi iyo naxdin hor leh u keenay. Hoos ayuu indhaha u rogay isagoo iska dhawraya in indhihiisa iyo kuwa Garaadku kulmaan war ileen ceeb iyo cadho naftu kaagama takariso!.

Cabbaar ayuu Wiil Waal aamusay si canaanta iyo eedayntii shirku soo jeediyey u kala degto.

Odaygii oo la yaaban waxa ragga kale afxumo kasoo baxaysa iyo aamusnaanta Garaadka ayaa isha ku leegay fiiriyay aadiyay wajiga Wiil Waal. Mise wuuba dhoolla caddaynayaa oo nin lagu gafayba uma muuqdo hubsiiimo halbaa la siistaaye, dhawris labaad ayuu u celiyey mise qosol ayuu gaws-ka-gaws Garaadkii ka wareegay.

Mar kale ayuu fajacay wixii madasha san-ku-neefle fadhiyey ayuu cid kale oo aan Garaadka ahayn oo nuuxsata ka waayey. Wuxuu is yidhi ama waad yara khafiiftay ama waad riyoonaaysaa ee sidani kollaba xaqiiqo ma aha.

Cabbaar ayaa shib la yidhi kolkii aamuskaa yara dheeraaday ayuu Garaadkii hadalkii dib u furay. Wuxuu yidhi, raggaw i maqal, waxaa idinku jira oo kaliya hal nin wax caqli iyo garasho dhamaystirin Eebe siiyey. Laba ma aha, oo saddex ma aha, waa uun hal nin oo kaliya odaygii ayaa qaadan waayey odhaahdaa. Isagoo dhakafaarsan ayuu Garaadkii sidaa u eegay wuxuu ka shakiyey in qawlka Garaadka

afkiisa kasoo degay iyo ka dhagihiisu maqleen ay isku mid yihiin. Qalbigiisa ayaa rumayn waayey maqalkiisa dhegihiisuna maqlayeen, wuxuuna yidhi ma runbaa ma riyaa.

Wiil-waal wuxuu ahaa nin aragti dheer sidaa awgeed dareenka wajiga odayga ka muuqda ayuu ka shakiyey oo is yidhi see wax u jiraan!. Wiil-waal Wuxuu is yidhi malaha odaygu fikradda maba keenin, xujadiina ma furin. Shakigaa dabadii ayuu hadal baadhis ah ku soo tuuray oo yidhi; saaxiib adigu fikradda ah inaad hunguriga soo qaado ma aadan keenine yaa kuu sheegay? Odaygii ayaa madaxa xoqday Maya, anigu, makeenin ! Tu yar oon dhalay oo aanan u ducaynin ayaa igula talisay ayuu ku jawaabay!. Wiil-Waal ayaa mar qudha haw fadhigii kasoo yidhi oo dhammaan intii madasha joogtay soo jeediyey. Maya ayuu yidhi idinkuma jiro hal nin oo caqli leh sidnaan hore u sheegay ee waxaa idinku jirta hal gabadh oo caqliga la saaxiib ah. Hal gabadh ayaa dhamaantiin idin dhaanta oo idinka aragti saraysa.

Sababtu waxay tahay idin ma weydiinin inaad hilib ii keentaan, waxaan idin weydiyey in nin walba keeno cadka rag walaaleeya. Ma gaajo iyo caydhnimo ayaad igu ogaydeen ama igu tuhmayseen? Hadalkayga guntada, oo xikmadayda dhagaha u fura; hungurigu waa cadka rag ama walaalo ka dhiga ama cadow ka dhiga. Adduunku waa nin qatan oo indhaha ka xumbaynaya iyo mid quuta oo dibbiro la daaca qudhunsan, (taajir dharagsan iyo faqiir qatan).

Qatane quutuu rabaa inuu wax ka qaato ama la qeybsado, faaqiirna taajirka ayuu in ka daadso is leeyahay., Sidookale ma haystane haystaha ayuu hunguriyeeyaa kolkaa ayey dhexdooda ka oogantaa oo ay dagaal iyo difaac tagtaa. Bal ii sheega, maxaa kale oo aan hunguri ahayn oo rag isu geeya?

Waxse ka weyn oo kale oo rag walaaleeya bal ii sheega? Kalmado noocaa oo kale ah ayuu ku canaantay. Raggii cargaagtamay markii ay hunguriga arkeen ayaa marxabbayn iyo waa run wajiyadooda laga dareemay.

Waxaa ka muuqata falsafadan Wiil Waal in sooyaalka taariikheed ee dunidu waliigaba ku dhisnaa dagaal dabaqadaha u dhexeeya. Marka laysku soo uruuriyo waxay isku haystaan wuxuu isugu imanayaa hawo adduun iyo hunguri sida Wiil Waalba caddeeyey qarniyo ka hor .

Sidoo kale waxaa si xikmad badan arintaa gabay ahaan ugu cabbiray Cabdullaahi Badel oo ah gabayaa isu geystay hal-abuur hodan ah iyo falsafad culus.

Waa kii lahaa:

- Shanta qaaradood waxa ka riday, qayladiyo buuqa
- Waxa qamarka guud iyo hawada, qaraxa loo saaray
- Waa quud nin haystiyo mid raba, inuu ka qaataaye
- Ama qaab uu gumaystuhu bartiyo, waa qoqoba riixe.

Sheekadii aan gunaanadee, intaasi markay dhacday ayuu Wiil Waal wajahay dhinacii odaygii. Wuxuu ku yidhi hadal amaan ah.Wuxuuna yidhi gabadhaadu waxay ka garaad wanaagsan tahay dhamaan ragga

halkan fadhiya. Qof rag iyo dumar toona u dhigma ma jirto, sidaa awgeed waxaan rabaa inaan kula xidido. Odaygii oo ay horay neefi uga soo booday ayaa waayahay waa lagu siin gabadha Garaadka ugu jawaabay. Adiguba haddii aad xilligaa joogi lahayd, fursad aad kula xidido Garaad Wiil-Waalna heli lahayd, miyaad ka laba labayn lahayd? Waa maya jawaabtu ayey ila tahay. Halkaa ayaa gabadhii xujadda furtay loogu dhisay Wiil Waal ciddihina ku xi dideen. Walaalayntii ragga wuxuu hungurigu ku darsaday inuu ragga xidid ka dhigo maxaa yeelay hungurigii geedka la keenay ayaa sababay in gabadhada Garaadka loo dhiso loo guuriyo.

Laylis

Ka jawaab su'aalahan

1. muxuu garaadku u diray odayaasha?
2. muxuu keenay ninkii xujada furay?
3. yaa usheegay odayga cadkuu keenay shirka?

